

Nidaamka la xiriira dirida Fariimaha gaa-gaab (SMS) ee Qoraalka ah (Text Message) ee macaamiisha

Waxa la yiraa (SMS Text) looguma tala galin in uu noqdo bugco la isku waydaarsado akhbaarta caafimaadka ee u baahan in la dhowro. Hay'ada la yiraa Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin wax akhbaar ah oo u baahan in la dhowro ma diri doonto ayadoo adeegsanaysa (SMS Text). Intaa waxaa dheer, Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin marnaba ma bixin doonto wax akhbaar ah oo cadeyn karta macmilada/bukaanadu cidda ay yihiin.

Akhbaarta *guud ee caadiga ah ee ku saabsan naas* nuuginta waa lagu wadaagi karaa Aalada (SMS Text). Wixii naas u dhiga ku saabsan ee weyn ama la xiriira xaalado caafimaad waxa ay u baahnaan doonaan in telefoonka looga wada hadlo ama u gudbin xirfadleyaasha bixiya daryeeladda caafimaad ee quseeya arrintaa.

Ogolaanshaha aad ogalaanayso in Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin kuu soo diri karaan (text messages) ku saabsan Mashruuca Naas u Dhiga ee WIC. waxaa la xiriira arrimahan hoose.

- Waan fahamsanahay inay roon tahay in telefoonka in la isku waydaarsado wixii wada hadal ah ee dhex maraya macmilka iyo hay'ada.
- Waan fahamsanahay in wixii fariimo/macluumaad ah ee Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin ay ii soo dirto laga yaabo in ay lacag yihiin oo qolada telefoonkaygu ay igu soo dalici karto lacagtaa.
- Waa aan la socdaa in aan mas'uul ka ahay wixii lacag ah ee qolada telefoonku iigu soo dalacdo isticmaalka macluumaadka la ii soo diray awgeed.
- Waa aan la socdaa in aysan waajib igu ahayn in aan u ogolaado Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin in ay ii soo dirto fariimaha telefoonka (text messages).
- Waan fahamsanahay in fariimaha telefoonka la isugu soo diraa (text messages) aysan ahayn kuwo bedelaya talada xirfedleyaasha ama daryeelada caafimaad ee aan helo.
- Markii aan rabo waa aan joogin karaa helida akhbaartaa anigoo afka ugu sheegaya ama qoraal u gudbinaya Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin (wac 612-348-5082 or email wic@hennepin.us).
- Waxaa aan mar walba la soo socodsiin Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin telefoonkayga gacanta ee cusub ama hadii lambarkii hore aanan mar dambe haysan.
- Waxaan fahamsanahay in ogolaanshahaygani uu jiri doono muddo for 5 sanno ah.

Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin

Mashruuca Naas u dhiga ee WIC

Hay'adani waa mid si sinaan ah ugu fidisa dadka oo dhan adeegyadeedda.

